Sookoobista Cilmi-baarista Caymiska iyo U-qalmida
Ka Dhaafida Shuruudaha Cilmi-baaris ee 1115

Sookoobista Codsiga
Barnaamijkan wuxuu u dhoweyn doonaa gobolka Oregon helitaanka guud iyadoo la dejinayo Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP) ee caymiska jira, oo la hubinayo diiwaangelinta dadka u-qalma, iyo ballaarinta u-qalmida dadka aan haysan caymiska.

Dhibaatada iyo Araarta
Gobolka oo dhan, qiyaastii lix boqolkiiba dadka Oregon ma haystaan caymiska caafimaadka waqti kasta oo la rabo. Qaar ka mid ah bulshooyinka midabka leh waxay ku dhowaad laba jibbaar u badan yihiin inay noqdaan kuwo aan haysan caymis (eeg Jaantuska 1-aad). Marka dadku aysan haysan caymiska caafimaadka, waxay inta badan la wajahaan deyn caafimaad oo weyn ama dib u dhigaan daryeelka loo baahan yahay, taasoo keenta natiijooyinka caafimaad ee ka sii daraya, kharashaadka badan iyo baahida loo qabo daryeel xooggan.

Jaantuska 1

Bulshooyinka midibka ah ayay aad ugu badantahay inaysan ceymisaneyn.



Xigasho: Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon (2019)

Safmareenka COVID-19 ayaa labaduba iftiimiyay ugana sii daray xaqsoor la'aanta caafimaad. Si kastaba ha noqotee, geedi-socodka u-qalmida ee la ballaariyay lana dardargeliyay ayaa uu oggolaaday Xeerka CARES ayaa keenay in si aad u yar u "lulmaan" dadka haysta Medicaid (halkaasoo dadka ku lumiyaan kuna helaan caymiska muddo laba sanno ah gudahooda). Waxaan higsaneynaa inaan sii kordhino guusha siyaasadahaan caymis ee wax-ku-oolka ah.

Sababaha caymis la'aanta way kala duwan yihiin. Dad badan ayaa laga yaabaa inay u-qalmaan OHP balse ma oga, halka qaar ka mid ah dadka deggan Oregon ee aan haysan caymiska ay wajahaan caqabado xagga caymiska ah iyadoo ugu wacan tahay xaaladda socdaalka ama caqabadaha kale ee la taaban karo ee diiwaangelinta iyo dib u go'aaminta. Gobolka Oregon wuxuu higsanayaa inuu ciribtiro caqabadaha u-qalmida, caymiska, ama isdiiwaangelinta kuwaasoo ka hor istaagaya qaar ka mid ah dadka deegaanka inay helaan ayna joogteeyaan caymiska caafimaadka.

Xigashada xogta: Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon (2019)

Himilada, Hadafyada iyo Geedi-socodka:

Himilada: Gobolka Oregon wuxuu leeyahay heer hoose oo caymis la'aan oo aan lahayn wax xaqsoor la'aan jinsiyadeed ama qowmiyadeed ah oo caymiska ah.

Hadafyada

- Caymiska la dejiyay ee loogu talagalay dadka halista ugu jira caymis la'aanta
- Hannaanka u-qalmida ee dabacsanaan, la dardargeliyay ee ilaaliya caymiska guud ee suuqyada oo dhan
- Dadka u-qalma ayaa la qoraa oo sii diiwaangashanaada

Geedi-socodka iyo Istaraatijiyadaha Suurtogalka ah ee Lagu Gaarayo Hadafka

Tallaabooyinka hoose waxay dhigayaantilmaamayaan geedi-socodka loo baahan yahay insi laguloo gaaro hadafyada. Nidaamkan waxaa la gaari doonaa iyadoo la isku darayo istaraatiijiyado ka dhaafid iyo ka dhaafid la'aan.

Tallaabada 1-aad. Hubinta in dadka mar dhow laga diiwaangeliyay barnaamijka OHP iyadoo ugu wacan tahay safmareenka COVID-19 ay ku jiraan caymiska ku habboon (barnaamijka OHP ama Suuqa) ee aan kala go'a lahayn.

Waxaan ku aragnay xasilnaan korortay caymiska OHP muddadii uu socday safmareenka COVID-19 iyadoo ugu wacan tahay siyaasadaha sida gaarka ah loogu abuuray arrintaas. Siyaasadahaani waxay dardargeliyeen u-qalmida iyo diiwaangelinta, waxay u oggolaadeen codsadeyaasha inay iskood u caddeeyaan dakhligooda, waxayna beddeleen hannaanka dib u go'aaminta. Gobolka Oregon wuxuu rabaa inay sii jiraan wixii shaqeeyay oo ay sii wadaan aasaaskan si loo hubiyo inuu sii socdo caymiska loogu talagalay dadka ka diiwaangashan OHP inta lagu gudajiro safmareenka balse dakhligoodu isbeddelo. Mararka qaarkood, tani waxay ka dhignaan kartaa in dadka hadda ku jira OHP ay u baahan yihiin taageero si ay uga helaan kala-guur oo aan xadka lahayn ee caymiska caafimaad ee laga helo Suuqa.

Tallaabada 2-aad. Hubinta in dadka u-qalma barnaamijka OHP ay helaaan oo sii diiwaangashanaadaan.

Inkastoo horumar ballaaran laga sameeyay Nidaamka U-qalmida, had iyo jeer waxaa furan in la horumariyo marka aan tixgelino dhibaatooyinka iyo caqabadaha ay dadka ka wajahaan go'aaminta u-qalmida iyo diiwaangelinta. Sahanka Caymiska Caafimaadka ee Oregon wuxuu muujinayaa in qiyaastii afartii qofba mid kamid ah dadka aan haysan caymiska ee ku sugan Oregon ay u-qalmaan OHP balse kama diiwaangashana. Mar labaad, farqiyo ayaa jira: Bulshooyinka Isbaanishka ama Laatiinka, 1 ka mid ah 3 ayaa u-qalma balse aan diiwaangashaneyn; oo dadka aan Isbaanishka ahayna ee isku aqoonsan inay leeyihiin jinsiyad aan ahayn Caddaan, qiyaastii boqolkiiba 42 waxay helaan dakhli ay ugu qalmaan OHP. Indha-indheyntan xogeed waxay muujinaysaa inay jirto fursad wacyigelin oo lagu bartilmaameedsanayo dadka u-qalma balse aan ka diiwaangashaneyn Diirad saarida dadka "u-qalma balse aan ka diiwaangashaneyn" si loo sameeyo wacyigelin iyo kaqeybgelin dheeraad ah ayaa noo dhowaynayso hadafkeena ah ciribtirka xaqsoor la'aanta ku saleysan midabka ee ka jirta caymiska.

Tallaabada 3-aad: Dheelitirka u-qalmida si loo ilaaliyo sii socoshada.

Iyadoo ugu wacan tahay adkaanta iyo isku keenida suuqa guud ee caymiska caafimaadka, waa wax iska caadi ah dadka qaarkiis inay si isdabajoog ah u ugu jiraan (ama "lulmaan") oo uga baxaan u-qalmida ama caymiska. Sahanka Caymiska Caafimaadka ee Oregon wuxuu muujinayaa in sannadkii 2019, boqolkiiba 35

dadka aan haysan caymiska aysan lahayn caymis iyadoo ugu wacan tahay inay “lumiyeen caymiska OHP.” Carqaladaynta noocan ah ayaa ah mid walaac badan abuureysa waxayna noqon kartaa mid nolosha wax ka bedesho maadaama dadku lumiyaan helitaanka daryeelka ama xiriirada ay la sameysteen bixiyeyaasha ay ku kalsoon yihiin. Gobolka Oregon wuxuu higsanayaa inuu xoojiyo sii wadida caymiska carruurta iyo qoysaska, iyo inuu balaariyo caymiska dadka dakhligoodu hooseeyo ee reer Oregon ee hada aan u-qalmin barnaamijka OHP, markay macquul tahay.

Istaraatijiyadaha ka-dhaafida la soojeediyay

Hubinta inay fududahay in la daboolo oo la iska diiwaangeliyo arnaamijka OHP waxaa lagu dhammeyn karaa iyadoo loo marayo xeelado dhowr ah oo suurtogal ah. Mararka qaarkood, shaqadan horey ayaa looga dhigay Qaabka Daryeel ee Isku Xiran oo si fudud ayuu ugu baahan yahay in kor loo qaado. Hoos waxaa ku yaala liiska siyaasadaha iyo istaraatijiyadaha suurtogalka ah.

Siinta u-qalmid 5 sanno ah oo socota carruurta.

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa u-qalmida 5-ta sanno ee joogtada ah ee carruurta, taasoo meesha ka saari doonta dib-u-eegista u-qalmida Medicaid iyo CHIP ee carruurta taasoo carqalad ku noqon karta daryeelkooda iyo horumarkooda. Gobolka Oregon wuxuu hadda fuliyaa xulashada federaalka ee 12-ka bilood ah ee u-qalmida carruurta oo dhan, da’da 0-18 jir, iyadoo la bixinayo qawaaniinta looga saarayo carruurta da'doodu tahay 19 jir ama ka tagaya gobolka marka loo eego shuruudaha federaalka.

U-qalmida joogtada ah waxay yareeysaa “lulmashada” carruurta nugul ee soo gala iyo ka baxa Medicaid. Tani waxay hagaajin doontaa xasilnaanta caymiska iyo sii socoshada daryeelka waxayna markaa wanaajin doontaa helitaanka daryeelka caafimaadka iyo natiijooyinka. Iyadoo ugu wacan tahay inay in badan oo ka mid ah carruurtan ay weli u-qalmaan caymiska, ciribtirka qulqulka ayaa dhimayo kharaadka maareynta iyo culeyska saaran qoysaska gobolkana dib uga shaqeynta codsiga Intaas waxaa dheer, ballaarinta tirada carruurta ee sida joogtada ah loo caymiyo inay ugu dambeyntii yareyn doonto kharashka caymiska ee xubin kasta.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Carruurta ku jirta OHP, tani waxay uga dhigan tahay caymis caafimaad iyo helitaanka bixiyeyaal caan ah oo joogteyn karaan muddo dheer, gaar ahaan inta lagu gudajiro sannaha dugsi-hoosaadka iyo da'da qaangaarka ah ee muhiimka ah. Waalidiinta iyo daryeeleyaasha carruurta ee ku jira OHP, tani waxay uga dhigan tahay inay yaraan doonto dib u go’aaminta u-qalmida, iyo welwelka yar ay ka qabaan gelinka yar ee shaqada inuu carqalad doono iyo in kale daryeelka carruurta.

U oggolow codsadayaasha inay iskood u caddeeyaan dakhliga.

U oggolaanshaha codsadeyaasha inay iskood u caddeeyaan dakhligooda waxay ahayd siyaasad guuleysatay oo ka dhalatay safmareenka COVID-19. Gobolka Oregon wuxuu jecel yahay inuu sii wado siyaasadan si ay u fududeyso geedi-socodka codsiga iyo go'aan qaadashada. Nidaamku wuxuu kordhiyay xawaaraha ay codsadayaashu loo daboolayo iyo helitaanka daryeelka iyadoo loo oggolaanayo caymiska kahor intaan si buuxda loo xaqiijin dakhliga.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Dadka u-qalma OHP waxay awoodi doonaan inay la shaqeeyaan Caawiyeyaasha Codsiga ama haddii kale laga diiwaangeliyo barnaamijka OHP iyagoo sameynaya caddeyn iskood ah ee heerarka dakhliyeed si ay u

helaan caymiska, kadibna waxay heli doonaan waqti dheeraad ah oo lagu soo uruuriyo dukumiintiyada lagama maarmaanka u ah xaqiijinta dakhliga, oo ay ku jiraan marsamooyinka kale (tus., u-qalmidii ugu dambeysay ee macaashka SNAP). Marka ay suurtogal tahay, gobolka Oregon wuxuu raadin doonaa inuu adeegsado xigashooyinka xogeed ee jira si loo sii yareeyo culeyska saaran qoysaska.

Qaadashada siyaasado qoysaska ka dhigaya kuwa si wadajir ah u hela caymis markay isbeddelaan dakhliyada.

Gobolka Oregon waxaa ka go'an inuu la shaqeeyo dawladda federaalka ah si loo aqoonsado fursadaha si qoysaska ugu diiwaangashanaadaan CCO-yada, inkastoo ay jiraan kala duwanaanta xakabadaha u-qalmida ee u dhexeeya carruurta iyo dadka waaweyn ee hadda u-qalma heerarka dakhliga ee OHP iyo kabbista ka jirta Suuqa. Waxaa suurtagal ah in siyaasadan ay u baahan tahay ka-dhaafid shuruudo ama hannaano dheeraad ah si looga faa'iideysto kabbis kasta ee loo heli karaan shakhsiyaadka ku jira Suuqa, iyadoo ujeeddadu tahay iska diiwaagelinta CCO.

Cilmi-baaris ayaa muujisay in caafimaadka iyo horumarka carruurta qayb ahaan ku tiirsan yahay caafimaadka iyo fayoqabka waalidkooda, waxaana muhiim u ah waalidiinta inay la kulmaan sii socoshada caymiska mar kasta oo ay macquul tahay. Intaa waxaa dheer, marka waalidiintu leeyihiin caymis oo ay yaqaanaan sida loo maro nidaamka, waxaa dhaca koror ku yimaada carruurta helaysa adeegyada kahortag ee lagu taliyay.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha ka tirsan qoyska, carruurta waxay heli doonaan caymis ku xiran ilaa heerka dakhliga ugu sareeya gaarsiisan yahay, xubnaha qaangaarka ahna sidoo kale way heli doonaan. Tani waxay ka dhigan tahay in xubnuhu aysan u baahneyn inay fahmaan macaashyada caymis ee kala duwan ama ay u raadiyaan shabakado kala duwan xubnaha kala duwan ee isku qoyska ah.

Kordhinta caymiska dadka dakhligoodu hooseeyo ee reer Oregon ee hadda aan u-qalmin caymiska

Gobolka Oregon wuxuu arkay xiisaha joogtada ah ee loo qabo dadaallada taageero ee lagu ballaarinayo helitaanka barnaamijka OHP ee shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo ee aan hadda u-qalmin iyadoo ugu wacan tahay xaaladda socdaal. Tani waa waa la gaaray ee loogu talagalay carruurta da'doodu ka yar tahay 19 iyadoo loo marayo barnaamijka barnaamijka Cover All Kids ee 2017. Gobolka Oregon wuxuu hadda bixiyaa caymis gobolku maalgeliyo oo dhammaystiran oo loogu talagalay ugu yaraan 6,500 oo carruur ah (dhalashada ilaa 19 jirka) oo gaaraya ama ka hooseeya 300% heerka saboolnimada federaalka (FPL) oo sida kale aan u-qalmin Medicaid iyadoo ugu wacan tahay xaaladda muwaadinnimo, iyo caymiska degdega ah ee loogu talagalay 42,834 oo dadka waaweyn ee soogalootiga ah ee gaaraya ama ka hooseeya 138% FPL iyadoo loo marayo Barnaamijka Caafimaadka ee Shisheeyaha ah Muwaadinka Soo Ifbaxaya (CAWEM).

Helitaanka aan xaqsoorka ku dhisneyn ee waxyaabaha looga hortago COVID-19, baaritaanka, daaweynta, iyo tallaalada inta lagu gudajiro safmareenka ayaa muujiyay baahida degdega iyo muhiimka ah ee la qabo si loo hubiyo inay dhammaan reer Oregon helaan daryeel caafimaad. Si loo gaaro hadafyada Oregon ee ah ciribtirka xaqsoor la'aanta caafimaadka marka la gaaro 2030 iyo ciribtirka caqabadaha u-qalmida, caymiska ama diiwaangelinta, Gobolka Oregon waa inuu gaarsiiyo u-qalmida caymis ee dhammeystiran dhammaan muhaajiriinta gobolka ku nool. Laba qodob oo hadda maraya Kalfadhiga Sharci-dejinta ayaa siin doona barnaamijka Ka-dhaafida Shuruudaha Muwaadinka/Shisheeyaha ee Caafimaadka Degdega ah (CAWEM) (lagu magacaabo “Caymi Dadka oo Dhan” ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aan sharciga lahayn.

Iyadoo la raacayo tallaabo kasta oo sharci-dejin ah oo la xiriirta qodob-ka(yada) Caymi Dadka oo Dhan, iyo ballanqaadka Gubanatooraha Gobolka, Gobolka Oregon wuxuu ku talo jiraa inuu la shaqeyso dawladda federaalka si loo aqoonsado fursadaha looga faa'iideysan karo maalgashiga gobolka iyo federaalka ee jira ee dadkan si loo dhiso barnaamij sii waara oo loo dhan yahay. Dadka haray ee aan lahayn caymiska ee gobolka waxaa ka mid ah qayb kamid ah dadka aan sharciga lahayn, ku dhowaad dhamaantoodna waxay wajahayaan caqabado luuqadeed, dhaqameed, ama cabsi ku saleysan oo ku saabsan helitaanka caymiska iyo daryeelka.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Gobolka Oregon wuxuu ka shaqeyn doonaa inuu kordhiyo oo ballaariyo caymiska haddii ay macquul tahay si ay ugu suurtogasho dhammaan shaqsiyaadka dakhligoodu hooseeyo inay helaan caymiska daryeelka caafimaadka, iyadoon la eegin heerka socdaalka.

Raadinta dabacsanaan badan si looga faa'iideysato maalgelinta Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo si loo diiwaangeliyo dadka u-qalma.

Si loo hubiyo in dadka u-qalma Medicaid la diiwaangeliyo, maalgelino ku aaddan wacyigelinta iyo kaqaybgalka ayaa looga baahan yahay heerar maalgelin oo badan. Gobolka Oregon wuxuu higsanayaa inuu si fiican u adeegsado lacagaha federaalka ee la heli karo si loo taageero isdiiwaangelinta ay sameeyaan dadka u-qalma.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Dadka u-qalma balse aan diiwaangashaneyn, waxaad kala kulmi kartaa wacyigelin iyo kaqeybgelin dheeraad ah si aad gacan uga geysato iska diiwaangelintaada barnaamijka OHP, si habboon luuqadaada ugu hadla ama wada-hawlgaleyaal aad ku kalsoon tahay iyo ururada bulsheed.

Siyaasadaha (ka-dhaafid la'aan) dheeraadka ah oo lagu taageerayo shaqadan

- Hubinta in CCO-yada ay sii wadaan bixinta wacyigalinta iyo raadinta adeegyada taageera iyo sii joogteeya xubnaha jira ee weli u qalma kahor taariikhaha dib u go'aaminta
- Baarista fursado lagula shaqeeyo Waaxda Macaamilka iyo Arimaha Ganacsiga (DCBS) si aad si fiican ugu fahamto fursadaha lagu xasiliyo u-qalmida dadka ka wareegaya barnaamijka OHP iyo Suuqa
- La jaanqaadida dadaallada kale ee jira ee gobolka iyo dawladda dhexe ee lagu doonayo in lagu ballaariyo ama lagu xasiliyo caymiska daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan Koox Hawleedka Helitaanka Guud iyo dadaallada sharci-dejinta si loo sahmiyo ikhtiyaarka dawladeed ee ku saleysan gobolka.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Iska Kaashiga Wacyigelinta Bulshada community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.